

XEERKA n. 168 rep.**MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMALIA****MAAREEYE**

MARKUU ARKAY sharciga lambar 4 soona baxay nobembar 1951, n. 1031, kaas oo ansaxinaya heshiiska ilaalinta dhulka Soomaaliya ee hoos yimaada Maamulka Walaayada Talyaaniga oo siiyanaya awood fulineed oo buuxda;

MARKI UU ARKAY amarka n. 75 soona baxay 29-5-1952 kaas oo asaasayo kulliyadda farsamada beeraha;

MARKI UU ARKAY amarka n. 84 soona baxay 19-6 1952 kaas oo asaasayo hoyga Iskuullada Muqdisho;

MARKI UU ARKAY amarka ku taariikheysan 16-10-1952 oo la xiriiro habeynta Dugsiyada Soomaaliya;

UUNA TIXGELIYEEY Fursadda 'siinta hab dhismeed iyo maamul Hoyga Agoonta Soomaaliya;

MARKI UU DHEGEYSTAY Golaha Dhexe ee Dugsiyada;

WUXUU XEEREEYAY:**Qod. 1.**

Waxa la asaasay Maamulka Dhexe ee Hoyga iyo Agoonta Soomaaliyeed.

Qod. 2.

Maamulka dhexe ee hoyga iyo Agoonta waxa ku waajib ah habeynta iyo kormeerka howlaha Hoyga iyo Agoonta soomaliyeed.

Qod. 3.

Marka laga hadlayo howlaha waxbarashada Hoyga, Maamulka dhexe ee Dugsiyada iyo Agoonta waa in ay u dhaqmaan sida maamul dhexe oo awood leh ee ah kan lagu asaasay wareegtada n. 158 sona baxday 16-10-1952.

Qod. 4.

Hoy kastaa waxa uu leedahay maamul u madaxbannaan oo u gaar ah miisaaniyaddeedana saadaaliya sannad kasta.

Shaqada sugeysa ee loo igmaday shaqaalaha fulinta, macallimiinta, maamulka, nadaamint iyo howsha dugsiyada kala duwan iyo agoonta si kastaba ha noqotee, waxaa sii wadaya lacagta ay siinayaan qeypta xafiiska shaqaalaha iyo AA. GG. ee MTMS.

Qod. 5.

Tabarucyada sanadlaha ah ee Maamulka Kalsoonida Talyaani waxaa si toos ah loogu shubaa Hoyga iyo agoonta waxaana lagu soo daraa cutubyo cayiman oo miisaaniyadaha gaarka ah.

Qod. 6.

Maamulka Dhexe wuxuu sameyn doonaa isku dubarididda shuruuc gaar ah ee Hoyga iyo agoonta ee degaanka si loo hubiyo hufnaanta iyo nadaamsanaanta maamulkooda. Nadaaminta ardayda waxa ay ku xiran tahay ansixinta Maareeyaha.

Qod. 7.

Maamulaha dhexe waxa magacaabo Maareeyaha kadib soo jeedinta Xafiiska Waxbaridda Dadweynaha.

Qod. 8.

Tabarruca sannadlaha ah ee loogu tala galay Hoyga iyo agoonta waxa la saaraa qdobka 67 e sannad maliyadeedka socdo iyo qdobada u dhigma ee sannadaha xiga.

Muqdisho, 31 oktoobar 1952.

p. MAAREEYE
Canino

Arkay diiwaangelinta n. 894 ee R. D.
15 nofembar 1952.
